Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-,
MAAHANMUUTTO- JA
KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

Macluumaad loogu talagalay dadka magangalyo doonka ah

Caruurta aan lahayn waalid ama ilaaliye

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

WAXAAD KA SOO CARARTAY WADANKAAGA HOOYO WAXAADNA MAGANGALYO U SOO RAADSATAY FINLAND.

Waxaad sheegtay inaad ka yar tahay 18 sano. Sida uu qabo sharciga Finland, dhamaan dadka kayar da'da 18 sano waa caruur. Waxay xaq u leeyihiin magangelyo iyo daryeel gaar ah. Dhammaan carruurta ku nool Finland waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah, sida xuquuqda inay iskuul dhigtaan iyo in daawo ay helaan haddii ay xannuunsadaan.

Inkasta oo aad Finland timid waalid la'aan ama mas'uul la'aan, keligaa ma tihid. Waxaa jira dad badan oo waaweyn oo ku caawin doona. Shaqaalahaada xarunta soo-dhaweynta ayaa ka taxadaraya wanaaggaaga iyo barbaarintaada. Waxaad kaloo heli doontaa wakiil kaa caawin doono arrimaha kala duwan ee kaala dhexeenaya mas'uuliyiinta.

Buugan yar wuxuu sharxayaa waxa dhaca marka aad magangalyo ka codsato Finland. Waxaad had iyo jeer weydiin kartaa wixii macluumaad dheeri ah xarunta soo-dhoweynta ama wakiilkaaga .



MASUULIYIINTA WAXAA WAAJIB KU AH INAY XAFIDAAN SIRTA

- Dalka Finland waxaad aamini kartaa masuuliyiinta, oo ay ku jiraan booliska iyo shaqaalaha ka shaqeeya Ilaalada Xuduudaha iyo Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland. Waa xirfadlayaal ku shaqeeya sida sharciga waafaqsan.
- Dhamaan shaqaalaha ka shaqeeya arimahaaga waxaa waajib ka saaran xog qarinta. Tani waxeey ka dhigan tahay in aan loo oggolayn inay kala hadlaan dadka dibada jooga wax kasta oo ku saabsan shaqadooda. Shaqaalaha jooga xarumaha qaabillaada, turjubaannada, wakiilkaaga iyo lataliyahaaga sharciga waxaa sidoo kale waajib ku ah inay xafidaan sirta.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

Hanaanka loo codsado magangalyada

1. U sheeg mas'uuliyiinta ilaaladda xuduuda ama booliiska inaad rabto inaad codsato magangalyo.

Waa inaad joogto dalka Finland marki aad magangalyo ka codsaneysid Finland. Markaad timaaddo Finland, u sheeg mas'uuliyiinta ilaalada xuduuda ama booliska inaad rabto inaad codsato magangelyo. Mas'uuliyiinta ayaa kuu diiwaangelin doona inaad tahay magangalyo doon, faahfaahintaada aasaasiga ah na gelin doona Diiwaanka Ajaaniibta kaana qaadi doona farahaaga (hadii aad ka wayntahay 6 sano jir), saxiixaada iyo sawirkaga. Hadii aad haysatid baasaaboor ama dukumenti kale oo aqoonsi ah, tus mas'uuliyiinta.

Fadlan ogoow inay dambi tahay inaad siiso macluumaad been ah oo ku saabsan aqoonsigaaga mas'uuliyiinta Finland. Dhammaan dadka ka weyn da'da 15 sano waxaa loo qabanayaa mas'uuliyadda dembigooda.

- Inta codsigaaga laga shaqaynayo, waxaad xaq u leedahay inaad sii degnaato Finland.
- Xubnaha qoyskaaga waxay ka codsan karaan sharciga degenaanshaha Finland kaliya ka dib markii aad hesho sharcigaaga degenaanshaha.

2. Mas'uuliyiinta ayaa kuu tilmaami doona xarunta soo-dhowaynta.

Waxaad ku noolaan kartaa xarunta soo dhaweynta inta codsigaaga laga shaqeenayo. Sidoo kale caruurta kale ee waalidkooda ama ilaaliyeyaashooda aysan joogin Finland ayaa u noolaan doona halkaas. Waxaad ku heleeysa nabad galyo xarunta soo dhawaynta. Marwalba waxaa joogaan shaqaale aad la hadli karto oo ku caawin kara.

Shaqaalaha xarunta soo-dhaweynta ayaa daryeeli doona nolol maalmeedkaaga, xannaanadaada iyo barbaarintaada. Waxaad aadi kartaa iskuulka waxaadna yeelan kartaa hiwaayado kaladuwan.

Waa inaad raacdaa sharcyada xarunta soo dhawaynta oo aad sameysaa wixii aad oggolaatay inaad sameyso. Haddii aad dhibaato ku qabto carruurta kale, u sheeg shaqaalaha arrintaas. U sheeg shaqaalaha xerada soo-dhaweynta sidoo kale halka aad joogtid, oo ka qabo taleefanka haddii qof ka socda xarunta soo-dhawaynta uu ku soo waco.

Xarunta soo-dhowaynta saameyn kuma yeelan karto ka shaqeynta codsigaaga magangalyada.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

3. Maxkamad degmo ayaa kuu yeeli doonto wakiil.

Sharci ahaan, dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano waa carruur mana la yeelan karaan arrima rasmi ah iskood mas'uuliyiinta Finland. Taasi waa sababta maxkamad maamul ay kuugu yeelayso wakiil. Wakiilkaaga waa qof weyn oo kaa caawin doona nidaamka magangalyada iyo arrimaha kale ee rasmiga ah. Waajibkiisa ama waajibkeeda waa in ay hubiyaan in danahaaga ugu fiican laguu tixgeliyo xaalada kala duwan.

MUXUU WAKIILKA SAMEENAYAA?

- Wakiilkaaga wuxuu ku weydiin doonaa aragtidaada ku aadan arrimaha kala duwan wuxuuna xaqiijinayaa in mas'uuliyiinta ay tixgeliyaan.
- Wakiilka wuxuu kuu sheegaya xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga inta lagu gudo jiro howsha magangalyada.
- Wakiilka wuu kula joogayaa markaad la kulmeysid mas'uuliyiinta, tusaale ahaan Waaxda Adeega socdaalka ama booliska. Isaga ama iyada ayaa sidoo kale la xiriiri doona mas'uuliyiinta ayagoo adiga ku matalaya.
- Wakiilka ayaa soo bandhigi doona aragtidiisa ama aragtideeda ku saabsan waxa ugu fiican adiga danahaaga xaaladaha kala duwan.
- Haddii loo baahdo, wakiilka ayaa ku keeni doona lataliye sharci lana sii xiriiri doona isaga ama iyada
- Haddii aad u baahan tahay inaad saxiixdo waraaqado muhiim ah, wakiilka ayaa kula saxiixi doonaa.

WAXA WAKIILKA UUSAN SAMEYNAYNIN:

- Wakiilkaaga kama taxaddarayo xannaano maalmeedkaaga iyo barbaarintaada. Xarunta soo-shaweynta ayaa u xilsaaraan arintaas. Wakiilkaaga ma faragashanayo xeerarka iyo dhaqanka xarunta soo-dhawaynta.

- Wakiilka kuma deeminayo lacag ama kuuma iibinayo sheey'yaal.
- Lama noolaan kartid wakiilkaada.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service



4. Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland ayaa baaraysa in codsigaaga lagu qiimayn doono gudaha Finland.

Inkasta oo aad magangalyo u soo raadsatay Finland, codsigaaga ayaa mararka qaar looga shaqayn karaa wadan kale.

Dowladaha xubinta ka ah Midowga Yurub iyo waliba Norwey, Iceland iyo Liechtenstein waxay raacaan Xeerka Dublin ee qiimaynta codsiga magalyada. Sida ku waafaqsan Xeerka, codsga magangalyada ayaa lagu qaabili karaa mid ka mid ah wadamadaan. U sheeg mas'uuliyiinta hadii:

- aad ku leedahay xubno qoys ama qaraabo wadan kale oo kujira heshiska Dubln
- aadan kale oo ku jira heshiiska Dublin uu ku siiyay sharciga degenaanshaha ama dalkugal
- aad horay u soo degtay wadan kale oo kujira heshiiska Dulblin
- Fara lagaaga qaaday wadan kale oo kujira heshiiska Dublin
- aad ka raadsatay magangalyo wadan kale oo kujira Dublin

Haddii xubno qoyskaaga ka tirsan ama qaraabadaada ah ay joogaan dal kale oo ka mid ah dalalka ku bahoobay heshiiska Dublin, waxaa la isku dayi doonaa sidii la isugu kiin geyn lahaa, ama dalka ay joogaan ama dalkaan Finland midkood. Codsigaaga magangalyo waxaa markaas lagaga shaqeenayaa wadankaas. Haddii aadan ku lahayn xubno qoys ama qaraabo wadan kale oo Dublin katirsan, codsigaaga waxaa lagaga shaqeenayaa gudaha Finland.

Codsigaaga magangelyada waxaa sidoo kale looga joojin karaa Finland xaaladahan soo socdo:

- In horay magangelyo lagaaga siiyay wadan nabad ah.
- In aad kaga tmid Finland wadan nabad ah oo aad magangelyo ke heli kartay.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

5. Sababahaaga aad ku codsaneeyso magangalyada waxaa lagu ogaanayaa wareysiga magangalyada.

Wareysiga magangalyada waa ballan aad muhiim u ah. Wakiilkaaga ayaa kaa caawin doono inaad u diyaar garoowdo. Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland ayaa kugu casuumi doonto wareysiga. Fadlan si taxadar leh u akhri casuumaada iyo dukumiintiyada la socdo isaga oo wakiilkaada uu kula joogo. Xarunta soo-dhaweynta ayaa kuu diyaarn doonta gaari ku geeya wareysiga.

Wakiilkaaga wuxuu xaadir ku ahaani doonaa wareysiga. Lataliyahaaga xaga sharciga ayaa sidookale soo xaadiri kara wareysiga, hadii loo baahdo.

Waqtiga wareysiga, mas'uuliyiinta ayaa ogaani doona qofka aad tahay iyo sida aad ku timid Finland. Waxaad u baahan tahay inaad bixiso macluumaad sax ah oo kooban oo ku saabsan xubnaha qoyskaaga. Hadii aad bixiso macluumaad been ah, waxaa hadhoow gadaal kaaga adkaan doonto in qoyskaaga keento Finland.

Waxaa lagu weeydiin doonaa sababta aad uga soo carartay wadankaaga hooyo iyo sababta aad ugu laaban Karin. La imoow cadeeyn walbo oo macquul ah oo taageri karta sheekadaada.

Si geesinimo leh uga hadal wax walba oo aad taqaano iyo waxa saamayn kara codsigaaga magangelyada. Sidoo kale sheeg hadaadan aqoon ama wax xasuusto. U sheeg wareystaha haddii aadan fahmin tarjumaanka ama qaar kamid ah su'aalaha lagu weeydiiyay.

Waa muhiim inaad soo sheegto dhamaan sababaha codsigaaga hal mar. Haddii aad gadaal dambe ka sheegtid sababa cusub, waa inaad lahaataa sabab aadan horay ugu sheegin sababahan. Sababta waa inay noqotaa mid aadan adiga shakhsi ahaan saameyn ku yeelan karin.

Wareysigaan waxaa laga sameynayaa qoraal, adiga waxaa qoraalkan lagaa siin doonaa koobi (haddii da'daadu ay ka weyn tahay 15 sano), sidoo kale waxaa koobi la siin doonaa wakiilkaaga.

WAQTIGA LAGA SHAQEYNAYO CODSIGA

- Waxay qaadaneesaa ugu badnaan 6 bilood in laga shaqeeyo codsigaaga nabadgelyada. Fadlan samir ku sug go'aanka.
- Haddii codsigaaga aan lagu go'aamin karin 6 bilood gudahood, Waaxda Adeega Socdaalka Finland ayaa ku ogeysiin doonta kuuna sheegi doonta qiyaasta wakhtiga go'aanka la gaari doono.
- Waxaad sidoo kale ka fiirin kartaa waqtiga la filayo inay shaqada qaadato shabakada Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

- Waxaad dokumentiyo dheeraad ah u gudbin kartaa Xafiiska Adeega Socdaalka ee Finland kadib wareysigaaga magangalyada. Waxaad sidaas sameyn kartaa haddii, tusaale ahaan, xaaladaada ay si weyn isu beddeshay iyada oo ay ugu wacan tahay dhacdooyinka dhawaan ka dhacay waddankaaga hooyo, ama haddii aad ilowday inaad wax muhiim ah sheegto inta lagu jiray wareysiga.
- Kala hadal arrinkan wakiilkaada. Asaga ama iyada ayaa u diraya macluumaad dheeraad ah Waaxda Adeega Socdaalka Finland hadii loo baahdo.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

6. Waxaad helaysaa go'aan

Waaxda Adeega Socdaalka Finland waxey sii wadeysaa inay baarto codsigaaga kadib wareeysiga magangalyada. Hadii loo baahdo, wakiilkaada ayaa la weeydiin doonaa inuu bixiyo macluumaad dheeraad ah. Marki codsigaaga go'aan laga gaaro, waxaad heli doontaa go'aan qoraal ah.

Go'aanka waxaa lagu gaaraa iyada oo lagu saleynayo xeerka Ajnabiga, macluumaadka aad bixiso inta lagu guda jiro wareysiga magangalyada, macluumaadka kale ee lagu soo bandhigay arrinta, iyo macluumaadka ay Waaxda Adeega Socdaalka Finland ay heeso ee ku saabsan xaaladda waddankaaga hooyo.

Go'aanka wuxuu noqon karaa mid oggolaansho ah ama mid diidmo ah. Booliska ama Waaxda Adeega Socdaalka ee finland ayaa siin doona adiga iyo wakiilkaaga go'aanka. La aqriso go'aanka wakiilkaada.

GO'AAN OGGOLAANSHO

Waxaa laguu gartay sharciga deganaanshaha, taas oo micnaheedu yahay inaad joogi karto Finland. Waxaa so toos ah-lagaaga diiwaangalinayaa Nidaamka Macluumaadka Dadweynaha ee Finland waxaadna heli doontaa lambar aqoonsi shaqsiyeed.

Sharciga deganaanshaha waxaa lagu bixin karaa sababo kala duwan. Sababahan waa:

1) magangalyo,
2) magangalyo caalami ah,
3) sababo naxariis kasban kara,
4) arrin aan qofka aan laga saari karin wadanka ama
5) arrin qofka uu yahay dhibbane la kulmay ka ganacsiga dadka.

Go'aankaada wuxuu qeexi doonaa sababaha laguugu siiyay sharciga deganaanshaha. Si aad wax dheeraad ah uga ogaato sababaha kala duwan ee lagu bixiyo sharciga deganaanshaha, fiiri bogga intarnetka iyo muuqaalada ay soo saareen Waaxda Adeega Socdaalka Finland.

Haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka, waxaad rafcaan uga qaadan kartaa go'aanka maxkamad maamul. Lataliyahaaga ayaa qori doona warqada racfaanka asaga oo kaashanaya adiga iyo wakiilkaada.

KAARKA SHARCIGA DEGANAANSHAHA

Waxaad heli doontaa kaarka sharciga deganaanshaha isaga oo la socdo go'aanka. Kaarku wuxuu caddeyn u yahay xuquuqdaada aad ku degnaan karto Finland. Kaarka wuxuu shaqeenayaa inta uu sharcigaaga deganaanshaha shaqeenayo

KAARKA AQOONSIGA

Wadanka Finland, waxaa loo baahan yahay kaar aqoonsi ah tusaale ahaan si aad u furato akoon bangi. Baasaboorka uu bixiyo waddankaaga hooyo ama kaarka aqoonsiga Finland ayaa loo aqbalaa dokumenti aqoonsi ahaan. Waxaad ka codsan kartaa kaarka aqoonsiga booliska.

DUKUMENTIYADA SAFARKA

Sharci ahaan, waxaad u baahan tahay inaad haysato dukumenti safar oo ansax ah. Haddii lagu siiyo magangelyo, waxaad codsan kartaa dukumentiga safarka ee qaxootiga. Haddii laguugu siiyo darajo magangelyo caalami ah ama sharciga deganaanshaha sababo kale, waxaad codsan kartaa baasaboorka ajnabiga. Waxaad u safri kartaa dibadda dibna ugu soo laaban kartaa Finland adiga oo siticmaalaya dukumiintiyadan.

U GUURISTA DEGMO/MAGAALO

Markii aad hesho sharciga deggenaashaha, waxaad ka guureeysaa xarunta soo-dhaweynta waxaadna u guureysaa guriga daryeelka carruurta. Waxaad ku noolaan kartaa halkaas ilaa aad ka jirsato 18 sano. Shaqaalaha guriga daryeelka carruurta ayaa ka taxadari doona xannaana maalmeedkaada iyo barbaarintaada. Waxaad wali sii haysan doontaa isla wakiilkaadi kaas aa oo aa caawin doona arrimaha rasmiga ah ilaa aad ka jirsato 18 sano.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

GO'AAN DIIDMO

Laguuma oggolaanin sharciga deganaanshaha, taas oo micnaheedu yahay inaadan joogi karin Finland.

Iyada oo la socoto go'aanka diidmada ah, Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland waxay kuu soo saarayaan go'aan amraya inaad ka baxdo wadanka.

Sidoo kale waxaa laguugu soo rogi karaa amar mamnuucaya inaad soo gasho wadanka. Waxay ka dhigan tahay inaan laguu oggolayn inaad ku laabato Finland ama aagga Schengen. Mamnuucitaanka wuxuu shaqeenayaa wakhtiga lagu jiro ama muddo xaddidan.

NIDAAMKA LA DEDEJIYEY

Haddii waddankaaga hooyo nabad yahay oo aad ku noqon karto waddankaaga hooyo, codsigaaga waxaa loo arkayaa mid aan sal lahayn. Go'aan diidmo ah ayaa lagu soo saari doonaa si degdeg ah waxaana lagaaga saari doonaa wadanka si a degdeg badan xaaladaha kale, badanaa 7 maalmood gudahood marka go'aanka la helo.

KA TAGISTA FINLAND

Hadii go'aanka kama danbeysta ah uu yahay diidmo, waa inaad ka tagtaa Finland. Haddii aad si iskaa ah ugu noqoneysid wadankaaga hooyo, waxaad codsan kartaa dib u laabashada ikhtiyaariga ah ee la taageero. Hadii aadan iskaa u laabanin, booliska ayaa dib kuugu celin doono waddankaaga hooyo. Ka hor intaanan lagu soo celin, booliiska waxay xaqiijin doonaan inaad soo dhaweyn badbaada leh aad ku hesho waddanaaga hooyo.

Haddii booliiska ay aamminsan yihiin inaad isku dayi doonto inaad ka hor imaado ka bixintaada wadanka, booliiska waxay kugu qasbi karaan inaad si joogto ah u soo xaadirto saldhiga booliiska ama xarunta soo-dhowaynta.

Booliiska waxay sidookale go'aan ku gaari karaan in lagugu haayo xabsiga. Qolalka xabsiga waa goobo xiran oo aadan bixi karin. Carruurta waa naadir in xabsi la dhigo. Waa mamnuuc in xabsi la dhigo carruurta da'doodu ka yartahay 15 sano.

RAFCAAN

- Waxaad xaq u leedahay inaad rafcaan kaga qaadato go'aanka Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland maxkamad maamul. Tilmaamaha racfaanka waxay ku lifaaqan yihiin go'aanka, oo ay kujiraan waqtiga xaddidan ee racfaanka lagu qaadanayo. Lataliyahaaga sharciga ayaa sameyn doona dukumiintiga racfaanka. Lataliyahaaga sharciga ayaa sameyn doona dukumiintiga racfaanka asaga oo kaashanaya adiga iyo wakiilkaaga.
- Maxakamadda maamulka ayaa xaqiijin karta ama beddali karta go'aanka ama u gudbin karta arrintaada inay dib u baaraan Waaxda Adeega Socdaalka Finland.
- Waad ka codsan kartaa fasax Maxkamadda Sare ee Maamulka si aad rafcaan uga qaadatid go'aanka maxkamadda maamulka. Si kastaba ha noqotee, ma baarto dhammaan rafcaannada. Taas ka dib, go'aanka ayaa ah noqonaya kama dambeys oo rafcaan kama qaadan kartid.
- Fadlan ogoow in Waaxda Adeega Socdaalka Finland aysan awood u lahayn inay ku siiso wax faahfaahin ah oo ku saabsan sida ay u socoto arrintaada inta lagu guda jiro howsha racfaanka. Wakiilkaaga ayaa ka heli kara macluumaad kaliya lataliyahaaga sharciga.

XUQUUQAHAADA

Waxaad talo weydiin kartaa lataliyahaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho caawimaad xaga sharciga ah, taasoo la macno ah inaad la kulmi karto lataliye sharci inta lagu gudo jiro howsha magangalyada oo dhan. Haddii loo baahdo, wakiilkaaga ayaa kuu keeni kara lataliye sharci oo la sii xiriiri doonaa isaga ama iyada.

Lataliyahaaga sharciga ayaa kaa caawin doona hanaankaaga codsiga
balse kaama caawin doono arrimo kale.

Turjubaan ayaa joogi doona ballamaha lala yeelan doono mas'uuliyiinta.

Turjubaanka wuxuu ku hadli doonaa luuqad aad fahmeeso. Isaga ama iyada ayaa tarjumi doona iyaga oo jooga goobta, ama taleefanka ama iyaga oo isticmaalaya xiriir muuqaal ah. Turjubaanada waa eex la'aan waxaana waajib ka saaran sir qarinta.

Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan kiiskaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho dukumiintiyada adiga ku quseeya. Waxaad ku codsan kartaa qoraal ahaan dukumiintiyada Waaxda Adeega Socdaalka Finland ee ku saabsan, tusaale ahaan, go'aankaaga ama wareysigaaga. Faahfaahinta ku saabsan codsigaaga laguma bixin karo taleefanka.

Waad shaqeeyni kartaa hadii aad ka wayntahay 15 sano.

Waddanka Finland carruurtu waxay aadaan iskuul halkii ay ka shaqeyn lahaayeen. Waad shaqeyni kartaa markaad 15 sano jirsato.

Waa inaad sugta dhowr bilood kadib markaad gudbiso codsigaaga magangalyada ka hor intaadan bilaabin shaqo. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shaqooyinka, la hadal shaqaalaha xerada soo-dhaweynta ama booqo bogga shabakadda Waaxda Adeegga Socdaalka Finland ee ah migri.fi.

Waxaad ku noqon kartaa wadankaaga hooyo.

Waad ka noqon kartaa codsigaaga nabadgelyada dibna ugu noqon kartaa wadankaaga hooyo wakhti kasta. Waad codsan kartaa kaalmo lacageed oo aad dib ugu laabato wadankaaga hooyo. Kala tasho suuragalnimada wakiilkaaga ama shaqaalaha bulshada.

Waxaad dirsan kartaa codsi cusub haddii loo baahdo.

Haddii duruufahaaga si weyn isu beddeleen kadib markaad hesho go'aankaaga kama dambeeysta ah, waxaad gudbin kartaa codsi magangalyo oo cusub. Ka hadal sida xaaladaada isu beddeshay oo soo bandhig sababahaaga cusub isla markaaba marka aad codsi cusub dirto. Haddii aadan haysanin sabab cusub oo aad ku codsato magangelyo, waxaad heli doontaa go'aan sheegaya in codsigaaga aan la baari doonin.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

WAAJIBAADKAADA

Gacan ka geeyso baaritaanka arrintaada.

Waa inaad daacada u ahaataa mas'uulyiinta oo aad gacan ka gaysataa baaritaanka dhammaan arrimaha la xiriira codsigaaga. Tani waxay ka dhigan tahay in adiga, tusaale ahaan, ay tahay inaad sheegtid dhammaan sababaha aad u codsaneyso magangalyo inta lagu guda jiro wareysiga magangalyada. Haddii aad bixiso macluumaad been ah, sharcigaaga ayaa dib laga joojin karaa.

Joog Finland inta lagu guda jiro ka shaqeynta codsgaaga.

Kama tagi kartid Finland inta codsigaaga laga shaqeynayo. Codsigaaga wuu dhacayaa, taasoo la macno ah inaan laga sii shaqeyn doonin haddii:

- aan lagula soo xiriiri karin ugu yaraan laba bilood ama
- mas'uuliyiinta ay ogaadaan inaad ka tagtay Finland

Xaadir dhammaan ballamaha.

Waa inaad tagtaa dhammaan ballamaha lagu ballamay. Haddii aad tagi weeydo wareysigaaga magangalyada sabab la aamini karo la'aanteeda, codsigaaga waxaa go'aan laga gaari karaa iyadoon waraysi la sameynin.

Haddii aad xannuunsato, sida ugu dhakhsaha badan u wargali shaqaalaha xarunta soo-dhaweynta. U gudbi warqada dhakhtarka ee cadeynta ah Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland markaas kadib.

U soo gudbi dhammaan dukumiintiyada quseeya codsigaaga Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland.

Haddii aad haysato baasaaboor, dukumenti aqoonsi ah ama dukumiintiyo kale oo la xiriira codsgaaga, u dhib wakiilkaaga si asaga ama iyada ugu gudbiyaan Waaxda Adeega Socdaalka ee Finland.

Hubso in lambarada iyo cinwaanada laagala soo xiriirayo ay cusbooneysiisan yihiin.

Sii Xarunta soo-dhaweynta lambarkaaga. Ka qabo taleefanka hadii shaqaale jooga xarunta soo-dhaweynta uu ku soo waco. Ogeysii xarunta soo-dhowaynta haddii aad badesho lambarka taleefankaaga.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

ARRIMAHA KALE EE MUHIIMA AH

Raadinta waalidiinta ama ilaaliyaasha

Haddii aadan aqoonin meesha ay waalidiintaada ama ilaaliyahaada ay joogaan ama aadan awoodin inaad la xiriirto, Waaxda Adeega Socdaalka ayaa iskudayi doonto inay ogaato halka ay joogaan oo ay la xiriirto. U sheeg wakiilkaaga haddii, sabab kasta awgeed, aadan rabin in waalidkaa ama ilaaliyahaada lala xiriiro. Ururka Laanqayrta Cas ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad raadiso waalidiintaada ama ilaaliyaashaada. Wixii macluumaad dheeri ah weeydi wakiilkaaga.

Baaritaanka da'da

Waa muhiim in mas'uuliyiinta ay ogaadaan da'daada saxda ah. Haddii aadan haysan baasaaboor ama dukumiinti kale oo aqoonsi rasmi ah oo caddaynaya da'daada, badanaa waxaa lagama maarmaan ah in da'daada si sax ah loo go'aamiyo, tusaale ahaan iyada oo la adeegsanayo baaritaanka da'da.

Baadhitaanka da'da waxaa la sameeyaa oo keliya haddii Waaxda Adeega Socdaalka u arko inay lagama maarmaan tahay. Adiga iyo wakiilkaaga ayaa laidin weydiin doonaa ogolaanshahiina baaritaanka. Haddii aad diido baaritaanka da'da sabab la qaadan karo la'aanteeda, waxaa laguula dhaqmi doonaa sidii qof weyn.

Baartaanka ma qaadanayo wakhti badan mana geeysto dhaawac. Inta baarista socoto, dhakhtar ayaa waraysi kaa qaadi doona raajana saari doona ilkahaaga iyo curcurkaaga.

Xirfadlayaal ayaa markaa qiimeyn doonaan da'daada. Haddii la qiimeeyo inaad tahay qof yar, waxba isma beddelayaan. Haddii la qiimeeyo inaad ka da 'weyn tahay ama aad ka yar tahay da'da aad sheegatay, adiga iyo wakiilkaaga ayaa fursad laidiin siin doonaa si aad u muujisaan ra'yigiina ku saabsan arrinka. Haddii laguu tixgeliyo inaad tahay qof weyn wixii intaa ka dambeeya, waxaa laguula dhaqmi doonaa sidii qof weyn oo magangalyo doonka ah. Waxaad u guuri doontaa xarun soo-dhaweyn oo loogu talagalay dada wawayn. Sidoo kale howsha wakiilkaaga ayaa dhamaan doonta.

DAAWO MUUQAALADA KUJIRA BOGGA YOUTUBE-KA EE WAAXDA ADEEGGA SOCDAALKA EE FINLAND EE KU SAABSAN CODSASHADA MAGANGALYADA

- Codsashada magangalyada ee waddanka Finland
- Sababo noocee ah ayaa lagu bixin karaa sharciga degenaanshaha?
- Yaa wax qabta inta lagu gudo jiro ka shaqeynta codsiga magangalyada?
- Caawinta sharciga ee nidaamka magangalyada
- Wareysiga magangalyada
- Sugitaanka go'aanka
- Go'aanka oggolaanshaha
- Go'aanka diidmada

migri.fi/videot-turvapaikanhakijoille

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

TURVAPAIKKA-,
MAAHANMUUTTO- JA
KOTOUTTAMISRAHASTO
Euroopan unionin tuella

MACLUUMAADKA XIRIIRKA

Waaxda Adeega Socdaalka Finland
cinwaanka boostada: PO Box 10,
FI-00086 Maahanmuuttovirasto
taleefoon: +358 295 419 600
email: migri@migri.fi
migri.fi

Non-Discrimination Ombudsman
cinwaanka boostada: PO Box 24,
FI-00023 Government
telephone: +358 295 666 817
email: yvv@oikeus.fi
www.syrjinta.fi

Xafiiska gobalka kuugu dhow ee Hay'ada Qaramada Midoobay U Xilsaaran Qaxootiga, UNHCR
cinwaan: Wenner-Gren Center,
Sveavägen 166,
11346 Stockholm, Sweden
telephone: +46 10 10 12 800
email: swest@unhcr.org
www.unhcr.org

migri.fi